

Stu&ium

Warbixin ku socota ardada Studium kuna saabsan macluumaadka cudurka Covid - 19

Si loo yareeyo faafinta cudurka xiliga duruustu socoto waxa uu dugsiga Studium raacayaa talaabooyinkan.

Waxbarashadu waxa ay ka baxeysaa labada dhanba in dugsiga la yimaado iyo in kompiutarka aad ku dhigataan idinkoo aan iskuulka joogin, waxaad heli doontaa fariin uu macalinku kuu soo diro mar kasta ee aad imanayso iskuulka.

Si loo yareeyo in uu cidhiidhi badan dhaco waxa loo yeeri doonaa ardayda qeyba mar, iyadoo aan ka digtoonaa doono in la qaato nasasho ama biririf waxa la qaadanayaa nasasho yar oo fasalka dhexdiisa ah.

Marka aad iskuulka joogto adiga ayay mas'uuliyad kaa saaran tahay in aad ka fogaato ardayda iyo shaqaalaha raacdana sharciyada caafimaad ee dowlada. Ka taxadar nadaafada oo ku dhaq gacmaha saabuun mar kasta oo aad skuulka timaado ama isticmaal daawada gacmaha lagu dhaqo.

Waxaan fasalka furi doonaa xili fiican intaydan iman aana kala fogayn doono ardayda iyadoo uu miiska kugu dhow banaan yahay waxaad fariisataa midka kursiga uu yaalo.

Mar kasta oo aad iskuulka timaado waa in aad si toos ah u abaarto fasalkaaga fariiso boos, fassal kasta waxaad ka heleysaa daawada gacmaha lagu dhaqdo.

Lama ogola in aad fariisatid fasalada hortoodaa casharka hortiiis iyo casharka dabadiis, markuu casharka dhamaado waa in aad ka tagtaa iskuulka.

Waxaa la kordhiyay nadaafada iskuulka iyadoo lagu celcelin doono nadiifinta albaabka gacantiisa, halka la qabsado jaranjarada, musqulaha, kuraasta dibada taal iyo miisadahaba.

Si loo yareeyo faafinta cudurkan waxaa xiran goobaha wax laga iibsado sida qaxwaha, mana jiraan meel lagu diiriyo/kululeeyo cuntada aad guriga kala timid.

Hadii aad u baahato in lagaa caawiyo kompiutarka sida loo galo casharada kala xiriir halkan losen.hjt.styrman@educ.goteborg.se ka sameyso balan. Teeda kale waxa aad la soo xiriiri kartaa hadii aad u baahan tahay lataliyaha, macalinka qaaska kuu caawinaya, iyo hagaha waxbarasho adigoo u soo diraya telefoon ama mail kana sameyso balan la kulan ah. Waxaad teleefankooda ka heli kartaa bogga aan ku leenahay internetka studiumbg.se

Waxaa iskuulka iman kara oo kali ah arday ama shaqaale caafimaad qaba. Hadii aad in yar xanuunsan tahay fadlan joog guriga oo kala soco daruusta dhinaca kompiutarka. Soo wargeli macalinka in aadan iman karin oo aad xanuunsan tahay.

Wixii faahfaahin dheeraad ah kala soco qeybta facebook iyo dhanka duruusta ka socoto ee internetka.